



Yaanu eegin ninku cawrada nin kale, haweenayduna yaanay eegin cawrada naag kale

Abii Saciid Alkhudri -Allaha ka raali ahaadee- wxuu Rasuulka Ilaahay ka wariyey inuu yiri: "Yaanu eegin ninku cawrada nin kale, haweenayduna yaanay eegin cawrada naag kale, ninna yaanu la huwan nin kale hal maro, haweenayna yaanay haweenay kale la huwan hal maro."

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu reebay in ninku eego cawrada nin kale, iyo inay haweenaydu eegto cawrada haweenay kale. cawraduna: waa wax kastoo laga xishoodo hadii ay muuqato, cawrada ninkuna waa inta u dhaxaysa xuduntiisa iyo lawgiisa, Haweenayduna dhamaanteed cawro ayey ka tahay raga ajaanibta ah, dumarka iyo raga maxaarimteeda ahna waxay u muujinaysaa inta ay muujiso marka ay guriga ka shaqaynayso. Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu reebay inuu ninku ninkale hal maro ama wax kalaba kula keliyoobo iyagoo qaawan, wuxuu kaloo reebay in haweenay ay haweenay kale hal maro ama wax kale kula keli noqoto iyagoo wada qaawan, waayo arinkaasi wuxuu keenayaa in qofba qofka kale cawradiisa taabto, taabashadeeduna waa xaaraan sida eegmadeeda loo xaaraan tinimeeyey, oo waliba way kasii daran tahay, waxayna keenaysaa fasahaad kasii wayn.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/8904>

